

Foomka Oggolaanshaha ee baaritaanka COVID-19

Ilmo yar oo 15 sano jir ah ama ka weyn ayaa oggolaan kara baaritaanka COVID-19 sida sida ay amraan Maamulka Caafimaadka Oregon oo raacaaya ORS 109.640(2)(a).

Waxaa buuxinaaya ilmaha da'doodu u dhexayso 15–18

Macluumaadka ilmaha

Waa lagu soo ogeysiin doonaa natiijooyinka baaritaanka.

| | |
|---|----------------------------|
| Magaca ardayga: | Lambarka moobeelka: |
| Cinwaanka iimaylka: | |
| Cinwaanka guriga: | Magaalada: |
| Lambarka boostada: | Degmada: |
| Taariikhda dhalashada (<i>Bisha/Maalinta/Sanadka</i>): | |

Oggolaanshaha

Markaan buuxiyo foomkan kuna soo celinaya dugsigayga, waxaan xaqiijinayaa inaan aqbalay inaan oggolaado in aniga la iga baaro COVID-19 inta la joogo xarunta. Waxaa laga yaabaa in layga baaro COVID-19 inta lagu jiro saddex xaaladood: (1) haddii aan yeesho astaamo cusub oo COVID-19 ah inta aan dugsiga joogo; (2) haddii aan kula kulmo dad qaba COVID-19 oo xarunta joogta oo waaxda caafimaadka dadweynaha ee deegaankuna ay ku taliso baaritaan; (3) baaritaanka markaan safar ka imaado. Waan fahmayaa inaan oggolaan karo mid kasta ama dhammaan noocyada baaritaanka.

Waan fahmayaa in baaritaanka COVID-19 uu yahay mid ikhtiyaar ah oo aan diidi karo inaan oggolaado, markaasna, aan la ibaari doonin. Waan fahmayaa in kaamkaygu uu iga dalban karo inaan guriga joogo kana maqnaado kaamka haddii aan xanuunsan nahay.

Waxaan fahamsanahay in Maamulka Caafimaadka Oregon (OHA) ay sameysay baaritaankaan ayadoo loo maraayo amar taagan. Waxaan fahamsanahay in OHA ama dugsigaa midna ahayn dhakhtarkayga iyo inaan baaritaankaan uusan badal u ahayn daawada uu i siiyo dhakhtarkayga. Waxaan u haystaa mas'uuliyad dhammaystiran oo buuxda inaan qaado tallaabo habboon oo ku aadan natiijooyinka baaritaankayga, taas oo ka dhigan inaan ka raadsado talo caafimaad, daryeel, iyo daaweyn dhakhtar haddii loo baahdo, ama inaan la hadlo waalidkay iyo/ama qofka masuulka iga ah haddii aan u baahdo caawimaad si aan u fahmo waxa aan samayn karo kadib markaan helo natiijooyinka baaritaankayga.

Waxaan fahmayaa inay jirto suurtagalnimada in natiijooyinka baadhitaanka COVID-19 ay been noqon karaan iyo in uu wali igu dhici karo COVID-19 xitaa haddii natiijada baaritaanku sheegto inaan qabin caabuqa. Waxaa kale oo aan fahamsanahay in haddii la iga helo COVID-19, natiijada baaritaanka lagu wargalin doono maamulka caafimaadka bulshada ee deegaanka sida sharcigu qabo. Haddii layga helo, waalidkayga iyo/ama mas'uulkeyga ayaa laga yabaa in loo sheego natiijooyinkayga si waafasqsan sharciga ORS 109.650.

Foomka Oggolaanshaha ee baaritaanka COVID-19

Haddii layga helo, waalidkayga iyo/ama mas'uulkeyga ayaa laga yabaa in loo sheego natiijoyinkayga si waafasqsan sharciga ORS 109.650.

- Waxaan oggolaansho u siinayaa shaqaalaha dugsiga inay iga baaraan COVID-19 haddii aan astaamo cusub oo xanuunka ah yeesho anoo dugsiga jooga.
- Waxaan oggolaansho u siinayaa shaqaalaha dugsiga inay I baaraan haddii aan la joogay dad qaba COVID-19 oo dugsiga jooga uuna baaritaanka ku talinaayo maamulka caafimaadka bulshada ee deegaanka.
- Waxaan oggolaansho u siinayaa shaqaalaha dugsiga inay iga baaraan COVID-19 markaan soo galo xarunta.

Saxiixa Ardayga

Taariikhda

Waxaad ku heli kartaa dhokumentigan luuqaddo kale, far waaweyn, qoraalka indhoolaha, ama qaabka qoraal ee aad doorbidayso. Kala xiriir Qaybta Jawaab-celinta iyo Ka soo Kabashada ee Koronafayras (CRRU) lambarka 503-979-3377 ama iimayl u dir CRRU@dhsosha.state.or.us. Waxaan aqbalaynaa dhammaan wicitaannada adeegga Relay ama waxaad garaaci kartaa 711.